



Billaw Dhiirigelin ah oo Lagula Xisaabtamayo Booliska

19 February 2020

Hay'adda Horizon waxa ay soo dhawaynaysaa go'aankii degdegga ahaa ee uu Taliyaha Cusub ee Booliska Somaliland, Sareeye Guuto Mohamed Aden Saqadhi, shaqadii kaga ruqseeeyey 17kii February 2020 askari ka tirsan booliska oo la sawiray isaga oo suuqyada Hargeysa ku garaacaya gabadh.

Arrintan dadka dibadda ka ahi waxa ay u arki karaan tallaabo yar oo aan macno weyn ku fadhiyin. Balse dadka reer Somaliland oo la qabsaday in saraakiisha booliska si joogto ah, oo aan gabbad lahayn, ay u dhaqmayeen sidii oo ay sharciga ka sarreeyaan, waxa ay tallaabadani u tahay mid ay soo dhawaynayaan, una arkaan in ay soo habsaantay, farriinta ay diraysaana tahay: in ay jirto cid la xisaabtamaysa falalka ay ku kacayaan.

Dhab ahaantii maaha markii koowaad ee la sawiro sarkaal boolis ah oo weerar ku qaadaya gababadh laguna baahiyo warbaahinta gaar ahaan baraha bulshada. Balse tallaabo mug leh oo laga qaadi jiray may jirin, taas oo kuwa kalena ku sii dhiirigelin jirtay in ay muwaadiniinta sifo sharci-darro ah ula dhaqmaan iyaga oo aan cabsi ka qabin cawaaqibka ka dhallan karta. Xaqiiqada ah in askari boolis ahi gabadhan ku garaacay waddooyinka maallin cad ayaa ku tusinaysa inta ay le'egtahay kalsoonida uu qabay oo ah in arrin caadi ah ay tahay waxan uu sameynayaa.

Shaqada ay Horizon ka qabato waaxda caddaaladda, waa arrin cad oo murugo leh in dadweynuhu ayna aaminsanayn in ay leeyihiin xuquuq, iyo in ay cabasho ka soo gudbin karaan sarkaalka booliska ee ku tagri fala xuquuqdooda. Balse in ay sidaa aaminaan iska daayoo, waxa ay qabaan cabsi dhab ah oo haddii ay tallaabadaa qaadaan in ay u soo jiidanayso dhibaatooyin hor leh.

Saraakiisha booliska oo u dhaqmaya hab xirfad sare leh oo ku dheehan asluubta sarkaalnimo waxa ay muhiim u tahay in dadku dareemaan nabad iyo xasilooni. Muwaadinka iyo bulshadu midna ma dareemayo ammaan haddii ayna ku kalsoonayn booliskoodu in uu yahay saaxiibka dadweynaha iyo ka illaalinaya. Boolisku waa udub-dhexaadka waaxda caddaaladda: garsoorka, xeer-ilaalinta, xabsiyada iyo qareenada ma gudbin karaan caddaalad haddii ayna haysan boolis ay ka go'antahay u adeegista bulshadiisu.

Maalgelinta ay xukuumadda Somaliland ku samaysay booliskeedu waxa uu ka marag-kacaysaa sida uu boolisku u yahay laf-dhabarta aasaaska bulsho nabdoon.

Aqoonta hoosaysa, fursadaha tababarka oo yar, dhaqaalaha oo kooban iyo goobaha lagu shaqaynayo oo xaaladdoodu fiicnayn iyo mushaharka ay qaataan oo aad u xaddidani waxa ay dhammaan qayb ka yihiin caqabadaha hortaagan booliska Somaliland, kaas oo ay kala mid yihiin bulshada caalamka intooda badan.

Hasayeeshee, xidhiidhka ay la leeyihiin bulshada, arrinta qudha ee fudaydinaysa ku xadgudubka iyo ku tagri-falku waa xisaabtan la'aanta, kalsoonida buuxda ee ay qabaan ee ah in wax kasta oo ay sameeyaan in aan lala xisaabtami doonin. Waa sababta tallaabada degdegga ah ee uu qaatay Taliyaha Cusub ee Boolisku ay macno weyn ugu fadhido. Waxa ay bar-billaw u noqon doontaa doodda wax-ku-oolka ah ee laga yeelan doono dib-uhabaynta booliska, kaas oo u saamixi doona bulshadu in ay waddooyinka nabad ku maraan, soo geli karaan saldhigyada booliska soona gudbin karaan cabashooyinkooda ka dhanka ah booliska iyaga oo aan ka cabsi qabin in lagu xadgudbi doono, ama laga aargoosan doono.

Hay'adda Horizon waxa ay ka shaqaysaa sidii kor loogu qaadi lahaa xuquuqal insaanka iyo sarreynta sharciga. Waxa aanu siinaa tallo sharci oo bilaash ah iyo taageero dadka u baahan kaalmada sharciga ama qoysaska qaraabadoodu ay xidhan yihiin ee u baahan kaalmo sharci. Si aad wax badan uga ogaatid adeegyada aanu ka fulino Somaliland, fadlan booqo mid ka mid ah saddexda xafiis ee Hargeysa ku yaala – Dhismaha Omer Hashi, Xaafadda Barakacayaasha ee Ayaxa una dhaw saldhigga booliska, iyo Xaafadda Barakacayaasha ee Daami una dhaw saldhigga booliska – ama xafiiskayga Burco oo ku yaala Dhismaha Sagal Jet. Sidoo kale waxa aad nagala soo xidhiidhi kartaa telefoonada Hargeysa 523603 ama Burco 711208.

Waxa kale oo aad nagala socon kartaa baraha bulshada:

Twitter: [@Horizon_SL](#)

Facebook: [@HorizonInstituteSomaliland](#)